WASAARADDA HAWLAHA GUUD, DIB U DHISKA IYO GURIYEYNTA

DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

MASHRUUCA NAGAAD

WAJIGA 2-AAD SURP-II

MAAL-GELINTA DHEERIGA AH EE MASHRUUCA

SIYAASADDA LA-MACAAMILKA DANEEYAYAASHA

Febraayo 2024

---

1. HORDHAC

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayaa hirgelineysa mashruuca Nagaad oo ah wajigii labaad ee mashruuca Horumarinta Kaabayaasha Magaalooyinka Soomaaliya (SURP II). Mashruuca Nagaad ayaa ah mashruuc ku kacaya $203.5 milyan oo doollarka Mareykanka oo laga fulinaya Dowladaha Hoose ee Muqdisho (Maamulka Gobolka Banaadir), Baydhabo (Dowlad-goboleedka Koonfur-galbeed), Garoowe (Dowlad-goboleedka Puntland), Kismaayo (Dowlad-goboleedka Jubbaland), Beledweyne (Dowlad-goboleedka Hirshabeele), iyo Dhuusa-mareeb (Dowlad-goboleedka Galmudug).Magaalooyinkan ayaa lagu doortay iyadoo la eegayo mudnaantooda siyaasadeed, dhaqaale, iyo amni iyo sidoo kale nuglaantooda (inay hooy u yihiin dadka gudaha ku barakacay (IDPs) iyo kororka dadka deegaansaday). Mashruucu waxa uu raadinayaa maalgelin saddexaad oo dheeri ah (AF-3) si kor loogu qaado hawlaha mashruuca ee socda. **Siyaasadda La-Macaamilka Daneeyayaasha oo hore** loogu cusboonaysiiyay maal-gelinta dheeriga kowaad (AF1) iyo maal-gelinta dheeriga labaad (AF2), oo la shaaciyay Abriil 2022, ayaa hadda loo cusboonaysiineya maal-gelinta dheeriga saddexaad (AF3).

2. RUKUNADA UU KA KOOBAN YAHAY MASHRUUCA

Mashruuca Nagaad iyo Maalgelinta Dheeraadka ah (AF) ee ku lammaanan waxa uu ka kooban yihiin Shan Rukumood (Components) oo horumarin ah. Rukunka 1aad waxa uu la xiriiraa (Kaabayaasha Dhaqaalaha Magaalada iyo Adeegyada), Rukunka 2aad waxa uu la xiriiraa (Xoojinta Hay'adaha iyo daaraasadaha), Rukunka 3aadna waxa uu la xiriiraa (Maaraynta Mashruuca), waxaana lagu unkay Unugga Xiriirinta Mashruuca ee Wasaaradda Howlaha Guud (PCU) iyo Unugyada Fulinta Mashruuca (PIUs) ee dowladdaha hoose ee lixda magaalo, Rukunka 4aadna waxa uu la xiriira Waxkaqabashada barakaca qasabka ah ee magaalooyinka iyo Rukunka 5aad oo ah, Ka Jawaabista Xaaladaha deg-degga ee Musiibooyinka (CERC).

3. UJEEDDADA HORUMARINTA MASHRUUCA

Ujeeddada Horumarinta Mashruuca (PDO) ee Nagaad ayaa ah "in la xoojiyo awoodda bixinta adeegyada guud ee dawladaha hoose, kordhinta helitaanka kaabayaasha

dhaqaalaha ee cimilada u adkeysan kara, kuna habboon magaalooyinka iyo in si degdeg ah oo wax ku'ool ah looga jawaabo barakaca ka dhashay abaaraha ka jira deegaanada la doortay".

4. LA-MACAAMILKA DANEEYAYAASHA

In daneeyayaashu si wax-ku-oolka uga qeeyb-qaatan hawlaha ah waxa ay xoojneysaa arrimaha la xiriira deeganka iyo sidii mashruucu bulshada dhexdeeda uga noqon lahaa mid waara. Waxay sidoo kale kor uqaada fursadaha keeni kara in bulshadu lala macaamilaayo aqbalaan mashruucda, iyadoo walibana gacan xoog leh ka qaadaneysa diyaarinta iyo hirgelinta mashruuca. Iyadoo la raacayo Halbeeg Bangiga Aduunka ee Arrimaha Deegaanka iyo Bulshada ee 10-aad (ESS10: La-macaamilka daneeyaasha and shaacinta macluumaadka), Wadanka deeqda helay waxaa looga baahanyahay in diyaariyo, welibana dhaqangeliyo Siyaad lagu macaamilaayo daneeyaasha taaso si cad u qeexeeysa waqtiga iyo hababka loola macaamilaayo daneeyaasha inta mashruucu socdo.

5. HAWLAHA DHISMOOYINKA EE SAAMEYNTA WANAAGSAN KU YEELAN KARA DEEGANKA IYO BULSHADA.

Maalgelinta mudnaanta leh ee hoos timaada Mashruuca Horumarinta Magaalooyinka Soomaaliya (SURP II) iyo Maalgelinta Dheeraadka ah (AF) waxaa ka mid ah dayactirka/kor u qaadista: (i) waddooyinka waaweeyn iyo yaryar ee magaalooyinka, (ii) buundooyinka; (iii) bulaacadaha; (iv) marshabiyeedyada; iyo (v) rakibidda nalalka waddooyinka. Hawlaha gaarka ah ee la qabanayo waxaa ka mid noqon doona: burburinta dhismayaal duugoobay; qaadista qashinka ka dhasha hawlaha dhismaha, dhirta aan nacfiga laheyn, dhagxaanta waaweyn, cawska iyo caqabadaha kale; qodista bullaacadaha furan, dib u buuxinta biyo-mareennada ; xoojinta aas-aaska wadooyinka, iyo dhismaha wadooyinka.

6. FAA'IIDOOYINKA DEEGAANKA IYO BULSHADU HELAYAAN.

Mashruuca waxaa la filayaa inuu keeno saameyn wanaagsan ee dhanka deegaanka ah, sida: (i) tayada hawada oo hagaagtay sababtoo ah ciriiriga waddooyinka oo yaraaday; (ii) bedqabka dadka lugaynaya waddooyinka oo horumarta; iyo (iii) daadadka saameya wadooyinka oo yaraada taaso ka dhalaneeysa bulaacadaha oo la horumariyay.

Mashruucu wuxuu sidoo kale sameeyn wanaagsan ku yeelanaya bulshada, tusaale ahaan : (I) Bulshada oo fursad u hesha inay isticmaalan dugsiyada, xarumaha caafimaadka iyo goobaha kale ee lagu bixiyo adeegyada bulshada iyo korukac wanaagsan oo kuyimaada hab-nololeedka dadka, (ii) Kor-ukaca amniga iyo badqabka dadka oo ka dhalaneysa horumarka lagu sameeyay wadooyinka iyo nalalaka ku xiran, (iii) Fursadaha shaqada ee bulshada oo kor ukaca kuyimaada maadama la dhisay kaabayashaa maxaliga, (iv) Saameyn dhaqaale oo wanaagsan oo laga dareemo nololmaameedka dadka iyo ganacsiyada; iyo (v) bixinta taba-baro la xiriira horumarinta kabaayaasha magaalooyinka iyo gacan-kuheeyntooda, taaso faa'ido uleh shaqaalaha iyo saraakiisha dawladaha hoose.

7. SAMEEYNTA IYI KHATARAHA KU IMAANKARA DEEGAANKA.

Khatarta iyo saameyta deegaanka ku imaan karta taaso ka dhalaneeysa hawlaha dhismayaasha waa kuwo iskayar, muddo dheer aan jireeyn, oo waliba ku xadidan oo keliya deegaanka ku dhaw meelaha hawlaha dhismayaasha ah laga wado. Saameynta aan wanaagsaneyn ee ka dhalankarta waxaa kamida:

- Wasaqda hawada oo kor ukacda, taaso ka dhalaneeysa isticmaalka gaadiidka dhismaha iyo qalabka culus ee la adeegsanaayo:
- Wasaq ku timaada biyaha iyo ciida, taaso ka dhalankarta haddii si lama filaan ah u daato shidaalka gaadiidka dhismaha ama ay jabaan boosaneerada ka dhisan meelaha dhismayaasho ka socdaa;
- Khashinka ka dhalanaaya hawlaha dhismaha oo kor ukaca iyo isaga oo aan sidii larabay loo maareyn.
- Carrada oo nadaab-guurta iyo carro-buura ah oo ka sameeysmata meelaha qaar, taaso ka dhalaneeysa hawlaha dhisamaha ee deegaanka isbedelka ku sameeyay.
- Biyaha nadiifka aan aheyn ee laga soo daadiyo goobaha dhismuhu ka socdo ayaa laga yaaba inay meelo fariistaan, taaso keeni karta in ay abuuranto meelo biyo galeen ah oo cayayaan ka dhasho;
- Heerka qaylada oo aan habooneeyn oo ka dhalan-kara hawlaha dhismaha iyo hawlgalka baabuurta iyo qalabka culus;
- Isbedel aan habooneeyn oo kuyimaada deegan iyo noolaha ku nool meelaha dhismuhu ka socdaa.

Saameyntaan aan mudada dheer jireeyn ee ka dhalaneeysa hawlahaan dhismaha waxaa looga hortagi kara ama lagu yareeyn karaa iyadoo la dhaqangelinaayo qorshooyin lagu maareeynaayo deeganka iyo bulshada.

8. SAMEEYNTA IYI KHATARAHA KU IMAANKARA BULSHADA:

Inkastoo ballaca hawlaha dhismuhu ay yihiin kuwo xadidan, waxaa jira karo khataro iyo saameyn mugleh oo imaan karta (oo ay ku jiraa n kuwo amni iyo jinsi). Maadama ballaca hawlaha gaar-gaarka ah ay iska xadidanyihiin, kuna egyihiin horumarinta iyo dib udhiska wadooyinka horay ujiray, waxaan laga baqeeyn inay dhacdo baahi loo qabo in dhul lala wareego, dad labara kiciyo. Sameeynta iyi khataraha ku imaankara bulshada ee mashruucaan waxaa kamid ah:

- In ganacsatada qaarkood ay waaayan ganacsigooda inta lagu guda jiro hawlaha dhismaha;
- Burbur kuyimaada goobaha bulshada sida darbiyada, boosaneerada iyo qubuuraha;
- Barakicinta dadka ku nool wadooyinka la dayactiraayo;
- Khataro laxariira shaqaalaha iyo xaaladaha shaqada, sida shaqaaleeysiinta caruurta, muranka shaqada, kororka dadka shaqadoonka ah oo iska horkeeni karta shaqa doonka iyo bulshada deegaanka, dembiyada galmada, xadgudubyada ka dhanka bini'aadamka iyo xadgudubyada ka dhanka ah jinsiga iyo faafka cudurada.
- Takoor lagu sameeyo kooxa laga tirada badanyahay iyo danyarta, taaso keeni karta inaysan ka faaideysin shaqooyinka ka dhalanaaya hawlaha mashruuca iyo
- Khataro amni oo ku imaan kara shaqaalah mashruuca iyo daneeyaasha taageeraya diyaarinta iyo hirgelinta mashruuca.

9. HABKA XALINTA CABASHOOYINKA

Mashruucu wuxuu yeelan doona hab si degdeg ah oo wax ku ool ah loogu xalliyo cabashooyinka ka imaanaya daneeyayaasha. Habkaani wuxuu ahaan doona mid ku haboon dhaqanka meesha kajira, oo ay heli karaan dhamaan dadka sameeyntu kasoo gaarto mashruuca. Habkan xallinta cabashooyinka dadka kama hor istaagi doono inay cabashadooda la'aadaan hay'adaha garsoorka iyo kuwa maamulka. Dadka mashruucu

saameeyo waxaa lagu wargelin doona jiritaanka habka xallinta cabashooyinka inta lagu guda jiro hawlaha la-macaamilka daneeyaasha. Cabashooyinka la diiwangeliyay iyo tallaabooyinka laqaaday waxaa sidoo kale loosoo bandhigi doona si guud, oo cid waliba arki karto. Habka xallinta cabashooyinka waxay ahaan doontaa mid kharsoodi ah, dhexdhexaad ah, u kuur-galeeysa xaaladaha gaar ah ee qofka, walibana ka turjumeeysa baahiyaha dadka mashruucu saameeyay. Habku wuxuu ogolaan doona in lasoo gudbiyo cabashooyin qarsoodi ah, xalna laga gaaro. Shaqsiyaadka soo gudbiya afkaartooda ama cabashadooda waxay codsan karaan in magacooda laqariyo.

Afkaar kasta ama cabasho ku saabsan mashruuca waxaa lagu soo gaarsiinkaraa mashruuca habab kala duwan oo ay ka midyihiin in qofku keensado, in taleefon lagu soo gudbiyo, in fariin taleefoon lagu soo qoro ama email.. Taleefoonada ama qaababka xiriirka loo sameeyn karo marka la doonaayo in cabasho la diiwaangeliyo ayaa hoos ku qoran.

Magaalada	Teleefoonka	Email
Mogadishu	2323	Xalinta.cabashada@gmail.com
Garowe	372	Mgure.suipp@plstate.so
Baidoa	2343	bmsurp2grc@gmail.com
Kismayo	2216	grievancesurpii@gmail.com
Beledweyne	0610369323	grievancessurp@gmail.com
Dhuusamareeb	0610228112	Cabashada.surp@gmail.com

Habka Racfaanka

Mashruuca wuxuu uu leeyahay sadax darajo ee cabashooyinka lagu xallinaayo kuwaa oo ka kala jirin doona degmada, magaalada iyo heerka Federaalka, sida ka muuqata shaxda soo socota. Qofka cabashada qaba wuxuu markasta awood uyeela doona inuu isticmaalo garsoorka iyo maxkadaha kajira dalka.



(1) **Gudiiga Xallinta Casbahada ee heer Degmo (Darajada 1-aad) :** Gudiiga Xallinta Cabashada ee laga dhiseyo heer Degmo waxa ay ka koobnaan doonan kooxo matalayaa haweenka, dhalinyarada, oday-dhaqameedka iyo culumada diinta; kooxo matalaaya dadka mashruucu saameyay iyo xubno kasocda Dawladda Hoose. Habka Diiwangelinta cabashada waxa uu tixgelin doona nidaamyada maxaalliga ah ee xallinta cabashooyinka, oo ah kuwa Soomaalida badankeed isticmaasho. Habka diiwangelinta casbahada ee heer Degmo waxaa ka qeeyb-qaadan doona qandaraaslaha, marka aan laga maarmin, iyadoo tageero ka heli doonta Unugga Fulinta Mashruuca (PIU) iyo shirkadda injineerka iyo lataliyaasha.

(2) **Gudiiga Xallinta Casbahada ee heer Goboleed (Darajada 2-aad):** Habka Xalinta Cabashada ee heerka Gobol waxa uu xallin doona cabashooyinka lagu xallin waayo Degmooyinka. Habka heer Goboleedka waxa uu ka koobnaan doona saraakiisha Maamulka Gobolka (sida Gudoomiye Ku-xigeenka Arrimaga iyo Duqqa Magaalada), Unugga fulinta mashruuca, injineerka iyo kormeeraha iyo sidoo kale kooxo matalaaya dadka soo cabtay.

(3) **Gudiiga Xallinta Casbahada ee heer Federaal(Darajada 3-aad):** Gudiiga Xallinta Cabashada ee heer Federaal waxa uu xallin doona cabashooyinka kasoo gudba Guddiga Xallinta Cabashooyinka ee Heer Goboleed, kaas oo u baahan in si guud looga arrinsado maadama laga yaabo in cabashooyinkaasi kajiraan magaalooyinka kala duwan ee ka qeeyb-geleya mashruuca. Gudigga Xallinta Casbahada ee heer Federaal waxa uu ka koobnaan doona Unugga iskuduwinta Mashruuca ee Wasaaradda Hawlaha Guud, Guriyeynta iyo Dib U Dhiska, kooxo matalaaya Gobollada cabashadu ka taagantahay iyo Wasaaradaha iyo Hay'addaha kale ee Dawladda Federaalka.

Habraaca Xallinta Cabashooyinka

Mashruucu waxa uu higsanaya inuu ku xalliyo cabashooyinka habraaca soo socda, kaas oo muujiinaaya waqtiga loo xadiday tillaab kasta:

	Tillaabooyinka Lagu Xallinaayo Cabashooyinka	Waqtiga la-heeysto	Cidda masuulka ka ah
1	Diiwangelinta cabashada	Hal-maalin gudaheed	Gudiiga Xallinta Casbahada ee heer Degmo oo taagero ka helaaya Unugga Fulinta Mashruuca, injineerka iyo kormeeraha
2	Baaris ku sameeynta xaqiiqada ka danbeeysa cabashada; oo haddii cabashada aan la aqbali karin (tusaale ahaan cabashooyinka aan la xiriirin mashruuca), waa in si cad loogu sheega cabtaha sababta aan cabashada loo aqbali karin.	Saddax maalmood gudahood	Gudiiga Xallinta Casbahada ee heer Degmo oo taagero ka helaaya helaaya Unugga Fulinta Mashruuca, injineerka iyo kormeeraha

	Tillaabooyinka Lagu Xallinaayo Cabashooyinka	Waqtiga la-heeysto	Cidda masuulka ka ah
3	Gudiiga Xallinta Casbahada ayaa ka doodi doona qaababka lagu xallin karo cabashada.	Saddax maalmood gudahood	Gudiiga Xallinta Casbahada ee heer Degmo oo taagero ka helaaya helaaya Unugga Fulinta Mashruuca, injineerka iyo kormeeraha
4	Dhaqangelinta xalka cabashada, oo haddii cabtuhu uusan ku qancin xalka, in loo fasaxo inuu racfaan qaato.	Saddax maalmood gudahood	Gudiiga Xallinta Casbahada ee heer Demo, ama Gobol ama Federaal, haddii racfaan loo baahdo.
5	Cabasho u qaadashada Garsoorka dalka, haddii cabtuhu sidaa rabo.	Xilli-kasta	Cabtaha

Cabashooyinka la xiriira Rabshadaha Ku Salaysan Jinsiga (GBV). Si looga hortago in la ceebeeyo ama looga sii daro dhibka maskaxeed ama jireed amaba la sababo aar-gudasho ka dhan ah cabtaha, Gudiiga Xallinta Casbahada waxaa uu lahaan doona habraac taxadar sare leh oo lagu tacaalaayo Cabashooyinka la xiriira Rabshadaha Ku Salaysan Jinsiga. Xubnaha Gudiiga Xallinta Casbahada waxaa lagu taba-barayaa sida loola tacaalo kiisas Rabshadaha Ku Salaysan Jinsiga, waxaana jiri doonta shaqaale dhedig ah oo loo xilsaaro wax-ka-qabashada cabashooyinkaa nuucaas ah. Shaqaalahan waxaa la shaqeeyn doona shaqaalaha kale ee dhedigga ah ee ka hawl gala Xafiiska Unugga Fulinta Mashruuca. Si loo hubiyo in aan la ogaan cabtaha cidda uu yahay, Xafiiska Diiwangelinta Cabashada waxa uu lahaan doona taleefoona lambar oo lasoo waco markii la-diiwangelinaayo cabashada. Markasta oo taleefoonka lasoo waco waxaa ka jawaabi doonta shaqaale dhedig ah oo u xilsaaran la-macaamilka bulshada. Lambaro wicitaankooda lacag la'aan yahay, sida kuwa Mogadishu laga hirgeliyay oo kale, ayaa la-filaaya inay noqdaan lambarada lasoo wici doono, si loo fududeeyo in dadku si sahlan usoo wacaan. Haddii kiis la xiriira Rabshadaha Ku Salaysan Jinsiga loosoo tabiyo Guddiga Xallinta Cabashooyinka, waa in si degdeg ah loogu gudbiyaa hay'adaha ku shaqada leh lata-caalka arrimaha nuucan ah, sida kuwa bixiyo talooyinka caafimaad,

hooy lacag la’aan ah iyo adeegyada kale ee daruuriga u ah ay helaan dhibanayaasha wajahay Rabshadaha Ku Salaysan Jinsiga.

Macluumaadka laxiriira kiisaska Rabshadaha Ku Salaysan Jinsiga waa in aan uusan diiwangelin Guddiga Xallinta Cabashooyinka ilaa shaqaalaha ka hawl-gala ay yihiin kuwo heysta taba-barka loo baahnaa, daruuriga u ah lata-caalida kiisaska nuucan ah. Macluumaadka la aruurin karo oo keliya ayaa ah nuuca cabashada (oraahda cabtuhu sheegay) iyo macluumadka kale ee dheeriga ah sida jinsiga cabtaha iyo inta sano ee uu jiro.